



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka Benefits.Ohio.Gov,
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga JFS.Ohio.Gov/County.

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga Medicaid.Ohio.Gov.

Ohio | Department of
Medicaid

Healthchek

Healthchek waa gunada Baaritaanka Ohio ee Xiliga hore iyo Kan Xiliyo gaar ah, Baarista iyo daawaynta (EPSDT).

Dadka kayar da'da 21 sano kuwaasoo ay daboosho hay'adda Ohio Medicaid ayaa heli kara adeegyo kahortag ah oo muhiim ah ayna bixiso Healthchek, ayna kujiraan:

- baaritaanada jirka,
- maqalka, aragga, iyo baaritaanada ilkaha,
- baaritaanka dhanka nafaqa,
- baaritaanada caafimaadka dhimirka,
- baaritaanada koboca,
- talaallada, iyo
- baaritaanka bir ku sumowga dhiigga (blood lead)

Caruurta aadka uyaryar waxaa lasiinayaa ugu yaraan 8 baaritaanada Healthchek ah sanadka koobaad ee dhalashadooda.

Caruurta waa inay maraan baaritaannada Healthchek markay jiraan 15, 18, 24 iyo 30 bilood.

Hal baaritaan sanadkiiba ayaa ladoonayaa in lamarsiyo caruurta kawayn 30 bilood.

Dhakhtar kasta oo aqbalaa Medicaid ayaa bixin kara adeegyada Healthchek. Waydiiso dhakhtarkaaga inuu cunuggaaga siiyo baaritaanka Healthchek.

Adeegyada taageerada ee Healthchek ayaad sidoo kale laheli kartaa si lagaaga caawiyo samaynta balamaha dhakhtarka, gaadiidka iyo gudbinta laguu gudbinaayo adeegyada bulshada ee cunada, dhakhtarka iyo baahiyaha kale.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan adeegyada Healthchek:

- laxariir Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska,
- booqo barta internetka Medicaid.Ohio.Gov/Healthchek,
- laxariir qorshaha daryeelkaaga Medicaid ee la maareeyay, ama
- wac Laynka Tooska ah ee Ohio Medicaid oo ah (800) 324-8680.